



JÄRFÄLLA

## TAAGEERADA WAALIDIINTA LOOGU TALAGALAY

Ku: Qofka degan degmada  
Järfälla oo taageerada  
gudshada waalidnimada u  
baahan



# Taageerada waalidiinta loogu talagalay

Warbixin dheeraad ka aqriso [jarfalla.se/foraldrastod](http://jarfalla.se/foraldrastod)

## Taageerayaasha waalidiinta

### Qoysaska ilmaha da `dooda u dhaxayso 0-5 sano

Talo iyo taageero xiriir la leh ahaanshada waalidnimada. Taageerada waa lacag la `aan. Taleefan: 08-580 283 64 ama 08-580 289 65

E-mail: [foraldrastod@jarfalla.se](mailto:foraldrastod@jarfalla.se)

## Rugta waalidiinta

### Qoysaska ilmaha ama dhallinyarada da `dooda u dhaxayso 6-20 sano

Talo iyo taageero ahaanshada waalidnimada, gooni ama qoys ahaan. Taageerada waa lacag la `aan. Taleefan: 08-580 290 63. Saacadaha taleefan soo dirida waxaad ka aqrisan kartaa [jarfalla.se](http://jarfalla.se).

E-mail: [foraldramottagningen@jarfalla.se](mailto:foraldramottagningen@jarfalla.se)

## Talo-siinta qoysaska

### Waxaa loogu talagalay lamaaneyaaasha ama qoysaska u baahan in xiriirkooda laga cawiyoo

Qiimaha hal booqasho qiyaastii waa 300 karoон.

Taleefan: 08-580 287 48

E-mail: [familjeradgivningen@jarfalla.se](mailto:familjeradgivningen@jarfalla.se)

## Kooxaha waalidiinta

Kooxaha waalidiinta waxaad ku baran kartaa waalidiin kale, aqoon cusub iyo fursad aad isku waydaarsataan khibradahiinna. Ku saaban kooxaha imminka degmada ka hirgaleen ka aqriso [jarfalla.se/foraldragrupper](http://jarfalla.se/foraldragrupper)

## Dugsiyada xannaanadda oo aan diiwaan-gelinta u baahnayn

Dugsiyada xannaanadda oo aan diiwaan-gelinta u baahnayn, oo ku yaalaan xaafadaha Barkarby, Jakobsberg iyo Kallhäll, waxaa adiga iyo ubadkaaga ka helaysaan fursad wax ku rinjiyeeysaan, heestaan, aqrisataan, ku cabtaan qaxwo/shaah ama ku sugnaataan goobta. Bay`ad ilmaha u roon waxaad goobta kula kulmi doontaa waalidiin kale iyo ilmahooda. Warbixin dheeraad ka aqriso: [jarfalla.se/oppenforskola](http://jarfalla.se/oppenforskola)

Dugsiyada xannaanadda oo aan diiwaan-gelinta u baahnayn waxay kaloo ku yaalaan Maria kyrka, Viksjökyrkan iyo S:t Lukas kyrka. Warbixin dheeraad ka aqriso: [svenskakyrkan.se/jarfalla](http://svenskakyrkan.se/jarfalla)

## **Rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta iyo ardayda**

Ardayda iyo xitaa waalidiinta waxay talo-siin iyo taageero awgood, la xiriiri karaan la taliyeha arrimaha bulshada, kalkaalisaada caafimaadka ee dugsiga iyo Aqoonyahanka cilminafsiga/saykoolojist ee iskuulka ee ka hawlgalaan Rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta iyo ardayda [Barn- och elevhälsan] ee iskuul kasta ku taallo.

### **La taliyeha ehellada**

Xitaa adiga oo qof ehel ah waxaad u baahan tahay taageero La taliyeha ehellada waxaa laga hela taageero iyo talo-siin loogu talagalay qofka ehelka ah oo qof ehelkiisa ah la dhiban caafimaad-darrada nafsi, caqliga ama itaaldarro ama cudur nafsi.

Taleefan: 08-580 28 441 ama 070-0024914 E-mail: anhorigstod@jarfalla.se

### **Taageerada kala tegista kaddib**

Wadashaqaynta furitaanka kaddib (SES), waa madal oo farsamada digitaalka ku salaysan oo lacag la`aan la adeegsan karo. Maadaama lamaanahaaga kala tagteen waxay madasha ka caawini doontaa sidii ubadkaaga aad ku fahmi lahayd oona ku taageeri lahayd, iyo sidii aad ku maarayn lahayd caqabadaha oona ugu hortegi lahayd dabinnada waalidiinta caadi ahaan ay ku dhacaan. Warbixin dheeraad ka aqriso jarfalla.se/ses

### **Xarunta arrimaha sharchiyada qoysaska**

Haddii waalidiinta kala tageen u baahan yihiin taageero iyo hagid ku saabsan, mas`uuliyadda ay ka midaysan yihiin dhinaca xannaanadda, hoyga iyo wada kulmida ilmaha iyo waalidka, waxay xaaladdaas la xiriiri karaan Xarunta arrimaha sharchiyada qoysaska. Ka wac lambarka guud ee xarunta xiriiryada ee Dowladda hoose: 08-580 285 00

### **Xarunta arrimaha falalka xoog-adeegsashada ee qoysaska**

**Ma dareemaysa in lagu geystay hanjibaad, xoog sheegasho ama cabsi falehanu u yahay qof qoyska ka tirsan?**

Noola soo xiriir talo-siin, taageero iyo caawinaad awgood.

Taleefan: 08-580 245 50

E-mail: relationsvaldsmottagningen@jarfalla.se

### **Ma ka walwalsan tahay in dabiicadaada ay saamayn ku yeelato dadka kugu dhow/gacaladaada?**

Noola soo xiriir talo, taageero iyo isbeddel awgood. Taleefan: 08-580 281 81

E-mail: relationsvaldsmottagningen@jarfalla.se

### **Turjubaan**

Turjubaan baad xaq uu leedahay mar kasta oo aad na boooqanayso. Laakin waa inaad na wargelisa inaad turjubaan u baahan tahay markii aad ballanka qabsanayso.



# JÄRFÄLLA

## **Talo-siiinta khadka taleefanka ee ururrada aan faa` iido-doonka ahayn**

### **BRIS Taleefan dadka waawayn - ku saabsan ilmaha**

Wac 077-150 5050, Isniin-jimce saacadaha 09-12. Wadahadalka waa lacag la`aan waxaana qarin kartaa aqoonsigaaga.

Af-carabi 077- 448 0900 talaado-khamiis saacadaha 9-12. bris.se

### **Khadka qoyska [Föräldralinjen Mind]**

Wac 020-85 20 00

Isniin-jimce saacadaha 10-15, khamiis kasta saacadaha 19-21.

Wadahadalka waa lacag la`aan waxaana qarin kartaa aqoonsigaaga.  
mind.se/foraldralinjen

## **Ma doonaysaa inaad caawinaad kugu habboon hesho?**

### **Dowladda hoose Järfälla**

La xiriir Xarunta adeegyada Dowladda hoose Järfälla. Wac 08-580 285 00,  
booqo Riddarplatsen 5 Bartamaha Jakobsberg ama e-mail u dir  
kontakt@jarfalla.se

### **Gobolka Stockholm**

Ku saabsan arrimaha caafimaad-darrada nafsiga ee ilmaha iyo dhallinyarada  
Wac 1177 talo-siin ama u gudbin awgeed ama ka baadigoob www.1177.se

### **Socialförvaltningen**

08-580 285 00

jarfalla.se/foraldrastod